

## **Waxaa isbadalaya xuduudaha dakhliga ee lacagta macaamiilnimada barbaarinta curdinka**

Xuduudaha dakhliga ee lacagta macaamiilnimada barbaarinta curdinku waxaay is badalayaan 1.8.2021. Xuduudaha dakhliga ee cusub go'aamada lagu salleynayo ee lacagta macaamiilnimada waxaa dhammaan loo sameynayaa bisha Oktoobar.

### **1.8.2021 xuduudaha dakhliga ah ee la dajjinayo:**

qiyaasta qoyska	xuduuda dakhliga €/bishii - lacagta 0 €	Lacagta oo laga bilaabo 27 €, dakhliga ugu yaraan (in ka yar 27e lacag ah lama qaadayo)	Lacagta oo ah 288 €, haddii uu dakhligu ka sarreeyo
	<b>1.8.2021</b>	<b>1.8.2021</b>	<b>1.8.2021</b>
2	2 798	3 050	5 485
3	3 610	3 862	6 297
4	4 099	4 351	6 786
5	4 588	4 840	7 275
6	5 075	5 327	7 762


Haddii qiyaasta qoysku aay ka sarreyso lix qof waxaa kor loo qaadaayaa xuduuda dakhliga ee lagu qiyaasayo lacagta la bixinayo, waxaana calaa ilmihii da'da qaan gaadhka ka yar kor loogu qaadayaa 189 yuuro. (17.12.2020/1052)

**Macaamiilka waxaa waajib ku ah si bilaa hakad ah in uu u soo ogaysiiyo** isbaddalada dakhliga qoyska ku saabsan, qiyaasta qoyska ku saabsan ama adeegga ku saabsan iyaga oo ku soo ogaysiinaya foomka lacagta macaamiilnimada. Foomkaas waxaa lagu bixin karaa oggolaanshaha isticmaalka diwaanka dakhliga, taas oo keenaysa in aanan loo baahnayn in la soo gudbiyo caddaymaha mishaarka ama taakuleynada Kela-da..

Isbaddalada waxaa fiiro gaar ah loogu yeelanayaa ugu horayn bisha ogaysiinta la sameeyay bilowgeeda laga soo bilaabo..

Haddii macaamiilku uunan ogaysiin degmada isbadalka ku yimid dakhligiisa ama uu macluumaad khaldan oo ku saabsan dakhligiisa aay soo gudbiyaan isaga ama wakiikiisu waxaay taasi keeni kartaa in lacagta kor loogu qaato ugu badnaan hal sano oo kii la soo dhaafay ah.

**Isbaddalada adeegga barbaarinta curdinka (maalmaha heshiiska, wakhtiga xanaaneynta iwm.) waa in markasta lagala heshiyyaa maamulaha xanaanada inta aanan foomka la buuxinin.**



**Hagitaanada iyo foomamka oo dhan** (finnish, ingiriis, foomamka internetka, foomamka la daabaci karo)

<https://www.tampere.fi/varhaiskasvatus-ja-koulutus/varhaiskasvatus/asiakasmaksut.html#tulotietojenilmoittaminen>

**Macaamiisha cusub** waa in aay sameeyaan qiimeynta dakhliga sida ugu dhakhsaha badan ama ugu dambeyn bisha socota inta lagu jiro ee wakhtiga la bilaabay barbaarinta curdinka.

### **Qiimeynta dakhliga ee ganacsadaha**

Foomka macaamiilnimada waxaa *dheer* oo aay tahay in uu ganacsaduhu buuxiyo foomka uu ku ogaysiinayo dakhligiisa si loogu qiimeeyo darajada lacagta macaamiilnimada. Foomka looma baahna in la buuxiyo haddii uu qofku oggolaanayo darajada u sarreysa ee lacagta macaamiilnimada.

### **Oggolaanshaha lacagta macaamiilnimada ee darajada u sarreysa ah**

Mas'uulka ilmaha ayaa haddii uu rabo ogaysiis ka samayn kara in uu oggolyahay in uu bixiyo lacagta ugu sarreysa ee macaamiilnimada, taas oo keenaysa in aanan laga rabin in uu sameeyo qiimeynta dakhliga. Oggolaanshaha kuwa bixiyay waxaa la siinayaa go'aan ku darajada ugu sarreysa ee lacagta macaamiilnimada ah. Oggolaanshaha waxaa lagu bixin karaa nidaamka macaamiilka ee elektrooniga ah ee barbaarinta curdinka.

